IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH
# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka — 8aad Muqdi. 1da Maarso 1980. Lr.3

*FAAFINTA BIL SOO BAXA* جريدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

**QIIMAHA :** waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA :** Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcagta.

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

W. M.

Eeg Boqqa Lamb. 349

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 29 ee 23 Feb. 1980, Magacaabid Duqa Magaalada Muqdisho iyo Ku xigeenno. Bogga 336

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 30 ee 7 Maarso 80, Magacaabid Madaxweyne ku Xigeennada Madaxweynaha JDS »» 337

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 31 ee 6 Maarso, 80 Ku maamuusid Billad Dahab ah oo Kacaannimo Jaalle Cabdirisaaq Maxamuud Abuukar. »» 338

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 33 ee 25.2.80 Ku maamuusid Billad Qalin ah oo Kacaannimo Jaalle Dr. Axmed Ashikr Bootaan. »» 338

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 14.2.80 Lumid Buug Keyd L. 11288 ku Shs. 434 u leeyahay Cali Siid Axmeed L. 75 »» 339

MAXKAMADDA GOBOLKA J/Hoose 21.2.80 Jeeg War. L. 280681 ku qoran Shs. 4.779/90 u leeyahay Xaf. Faraca Canshuuraha Beriga L. 76 »» 340

SOOMAALI AIRLINES, Ogeysiis shir aan Caadi L. 77 »» 341

Avviso di Convocazione de Assemblea Ordinaria e Straord-inaria

SHARIKADDA CONCERIA $ CALZATURIFICIO SOMA; Ogeysiis Fadhi aan Caadi aheyn L. 78

SHIRKADDA BEERTA MURBA; 17.2.80, Ogeysiis Fadhi aan Caadi aheyn L. 79 »» 342

SHIRKADDA BEER — TACABKA LUUL L. 81 »» 343

SHIRKADDA CIEFFE S.P.A. Shir Caadi dhaaf ah
SHIRKADDA ORAI S.P.A. SHIR CAADI DHAAF AHL. 83 »» 345

## QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 29 ee 23 Feb. 1980 Magacaabid Duqa Magaalada Muqdisho iyo Ku Xigeenno.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Qod. 13aad, lambarka 6aad ee sharciga Golaha Shacbiga ee Deegaanka iyo Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka;

MARKUU TIXGELIYAY: duruufta gaar ahaaneed ee magaalada Xamar iyo isbedeelka ballaaran ee ku dhaca maalinta maalinta ka dambeysa hawlmaalmeedkeeda, dhan bulsho, dhaqaale, abaabul iyo kicinba;

MARKUU TIXGELIYAY: awoodda dhaqaale ee Dawladda Hoose ee Xamar iyo kaalinta ay kaga jirto qorshaha guud ee horumrinta Dalka;

MARKUU ARKAY: In ay lagama maarmaan tahay in hakad laga ilaaliyo xawliga ay magaaladu ku socoto, lana xiriirivo maamulkii ivo hogaankii abaabulav qorshaha magaalada, taabagelitiisana gacanta ku hayey, lana kafaala qaado maamul la dhumuc ah culeyska magaalada sida joogtada ah ugu soo dhacaya;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka soo socda:

### Qodobka 1aad

Jaalle Yuusuf Ibraahim Cali «Abuuraas» waxaa lagu magacaabav Duqa Magaalada Xamar.

### Qodabka 2aad

Jaalle Cabdullaahi Salaad Warsame iyo Jaalle Xasan Xaaji Maxamuud «Garwevne» waxaa lagu kala magacaabay ku-xigahaDuqa Qevbta Maaliyadda iyo ku-xigaha Duqa Qeybta Hawlaha Guud.

### Qodobka 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee JDS.

Muqdisho, 23 Feberaayo 1980

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre
Madaxweynaha JDS,

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 30 ee 6 Maarso 80 Magacaabid Madaxweyne Ku xigeennada JDS,

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qodobbada 82aad iyo 84 ee Dastuurka;

MARKUU TIXGELIYEY: in ay lagama maarmaan tahay in la magacaabo Madaxweyne Ku Xigeenno si loo dhammeystiro Hay'adaha Dastuurku tilmaamay;

MARKUU DHAGEYSTAY: Ra'yiga Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed iyo kan Golaha Shacbiga;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo socda:

Qodobka 1aad

Jaalle Maxamed Cali Samatar iyo Jaalle Xuseen Kulmiye Afrax waxaa lagu kala magaaacbay Madaxweyne Ku xigeenka 1aad iyo Madaxweyne Ku xigeenka 2aad ee Madaxweynaha Jahmuuryaidda Dimoqaraadiga Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee JDS,

Muqdisho 6 Maarso 1980

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxweynaha JDS,

L. 30

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 31 ee 6 Maarso 80 Ku maamuusida Billad Dahab ah oo Kacaannimo Jaalle G/Sare Cabdirisaaq Maxamuud Abuubakar

MADAXWEYNAHA J.D.S.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka·
MARKUU ARKAY: Sharciga L. 65 ee 19 Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: Kaalinta lama ilaawaanka aheyd ee Jaalle G/le Sare Cabdirisaaq Maxamuud Abuubakar uu ka caatay taabagelinta iyo hogaaminta siyaasaddii kacaameynta iyo Soomaaliyeenta Waxbarashada Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya;

MARKUU TIXGELIYEY: Sidii uu ugu hawlgalay, u fuliyey ugana lib keenay, isagoo ku shaqaynayey dareen sare ee kacaannimo, damiir nool, abwaanimo, xilkii adkaa ee la xiriiray samata bixinta, raridda iyo dejinta dadkii ku tabaaloobay abaartii daba dheer;

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in aqoonsiga uu mudan yahay la siiyo, lagana abaalmariyo galladda uu Ummadiisa u geystay;

MARKUU DHAGEYSTAY: Talada Guddiga Abaamarinta 10 guurada Kacaanka;

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo socda:

Qodobka 1aad

Waxaa lagu maamuusay Billad Dahab ah oo Kacaannimo Jaalle G/Sare Cabdirisaaq Maxamuud Abuuakr.

Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu Saxiixo Madaxweynaha J.D.S., waxaana lagu soo saari doonaa Faafin-
Ku maamuusid Billad Dahab ah oo Kacaanni
Xeerka Soo socda:

Muqdisho 6 Maarso 1980

Madaxweynaha JDS

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 32 ee 2 Maarso 1980 Magacaabidda Lixda Xildhibaan.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad Xubintiisa 14aad ee Dastuurka J.D.S.;

ISAGOO TIXGELINAYA: **Fulinta waajibaadka ku xusan Qod.** 6aad xubintiisa 4aad

### WUXUU SOO SAARAYAA

### Qodobka 1aad

Wuxuu Jaalle Madaxweynaha Magacaabay lixda xildhibaan ee hoos ku qoran:

1. Jaalle Cali Xaashi Cilmi
2. Jaalle Maxamed Cali Mire
3. Jaalle Mire Awaare Jaamac
4. Jaalle Xaaji Maxamed Xuseen Xaamuud
5. Jaalle Maxamed Faarax Xasan
6. Jaalle Maxamuud Axmed Cali

### Qodobka 2aad

Xeerkani wuxuu dhagan galay 24.1.80 waxaana lagu soo saari doonaa Faafntia Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 2 Maarso 1980

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Madaxweynaha JDS,

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 33 ee 25 Feb 1980 Ku maamuusid Billad Qalin ah oo Kacaannimo Jaalle Dr. Axmed Ashkir Bootaan.

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka;

MARKUU ARKAY: Sharciga lr. 65 ee 19ka Oktoobar 1970;

MARKUU TIXGELIYEY: Sida qaddarinta mudan ee Dr. Axmed Ashkir Bootaan uu u abaabulay, hogaamiyey, una hawlgaliyey Guddiga Farsamada ee Dastuurka, isagoo ahaa Guddoomiyihii Gudddigaas;

MARKUU TIXGELIYEY: Kaalintii weyneyd ee Jaalle Bootaan uu ka geysta diyaarinta shuruucdii isdabajoogtay ee lagama maarmaanka u aheyd taabagelinta Dastuurka Dalka iyo hay'adihii ka farcamay;

MARKUU TIXGELIYEY: Waayihii adkaa ee fulinta xilalkaas kala soo gudboonaaday mintidnimada iyo dareenka Sare ee Kacaannimo uu goor kasta ugu adeego danaha Ummadda Soomaaliyeed

MARKUU ARKAY: In ay lagama maarmaan tahay in qof kasta waxa uu galo ama uu gudo laga abaalmariyo, aqoonsiga uu mudan yahayna la siiyo.

MARKUU TIXGELIYEY: Talada guddiga Abaalmarinta;

WUXUU SOO SAARAY

Xeerka Soo socda:

Qod. kaliya

Waxaa lagu maamuusay Billad Qalin ah oo Kacaannimo Jaalle Dr. Axmed Ashkir Bootaan, Guddoomiyihii Guddiga Farsamada Dastuurka.

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JDS wxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 25 Febaraayo 1980

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

QAYBTA SADDEXAAD

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: In Buug Keydka dhumay oo lambarkiisu ahaa 11288 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 434 uu iska lahaa Cali Siid Axmed sida ku cad warqadda lam. 247 Taariikh 14.2.80 oo bangiga Ganacsiga Keydka Soomaaliyeed Laanta 3aad.ee

HADDUU ARKAY: qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) Buug Keydka lam. 11288, oo ku qoran magaca Cali Siid Axmd ayna ku jirto Sh.So. 434

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo keydka Laanta 3aad u beddelo Cali Siid Axmed buugga Keydka), ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato mudo aan ka yaryn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S., haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho 14 Feb. 1980

Guddoomiyaha Maxkaxadda G. Banaadir

Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 75

## MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA J. HOOSE Dr. Xiis Cumar Maxamed.

HADDUU ARKAY: Codsiga ah ee lam. FCB/DJ/3/80 ee T. 14.2.80 ee ka soo baxday Fararca Canshuuraha Biriga Deg. mada Jamaame ee ay ku soo weydiisteen in loo soo cusbooneysiiyo ama loo furo jeeg wareega ee lamb. yahay 280681, ee la qoray taariikh.4.2.80 kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 4.779,90 (afarkuntodobaboqoltodobaatan iyo sagaal shilin iyo sagaashan senti) oo ay leedahay lacagtaas sare Canshuuraha Biriga Degmada Jamaame.

HADDUU OGAADAY: In ay tahay Shaqa Maxkamadeed in ay soo saarto Go'aan.

HADDUU ARKAY: Qodobka 69 X.L. 9 ee soo baxay 9.9.65.

### WAXAA LA CADDEYNAYAA

Dhumidda Jeega wareega ee Sumadiisuna aan ku xusnay oo ah lam. 280681, oo ku qoran tahay lacag dhan ShS. 4.779,90, (afarkun todobaboqoltodobaatan iyo sagaalshiin iyo sagaashan senti) oo ay iska leedahay Faraca Canshuuraha Biriga Degmada Jamaame.

In la cusbooneeysiiyo Jeegaas oo aan kor ku soo sheegnay lambarkiisa oo ku qoran Xafiiska Faraca Canshuuraha Biriga Degmada Jamaame 15 (tobaniyoshan beri Gudahooda laga bilaabo markii lagu qoro Faafntnai Rasmiga ah, gacantana laga saaro Xafiiska Faraca Canshuuraha Biriga ee Degmada Jamaame haddaan la helin Cid kale oo jeegaas wadato.

Kismaayo 2.2.1980

Maxkamadda Gobolka Jubada Hoose

Dr. Xiis Cumar Maxamed

L. 76

SOMALI AIRLINES

«Sahmiileyaasha shirkadda Somali Airlines S.P.A. waxaa la weydiisanayaa inay isugu yimaadaan shir aan caadi aheyn iyo mid caadi ah oo lagu qaban doono xarunta shirkadda ee 12ka Abriil, 1980, saacaddu markey tahay17:00 Haddii fadhiga hore suura geli waayo maalita 12ka, waxaa mar labaad la isu iman doonaa 13ka Abriil, saacaddu markay tahay 17:00

WAXYAABAHA SHIRKA LAGAGA WAD HADLI DOONO

1. SHIR AAN CAADI AHEYN

1. Kordhhinta Rasu-maalka iyo oggolaanshihiisa.

2. SHIR CAADI AH

1. Xogwarran uu soo sameeyey Guddiga Maamulka iyo warbixin uu soo diyaariyey Guddiga Baaristu;

2. la hor keeno miisaaniyadda iyo xisaabihii khasaaraha iyo macaashka oo ku eg 31.12.1978 iyo go'aannadii la xiriirey;

3. Magacaabid Guddi Maamul iyo Guudi Baaris oo cusub

Waxaa la ogol yahay inay shirweynaha ka soo qayb galaan dadka sahmiga ku leh shirkadda ee ku qoran buugga rasmiga ah dadka sahmiga shirkadda ku lihi ay ku qoran yihiin. Si looga qeyb galo shirweynahaa waxaa loo baahan yahay in sahmiyada la sugo ugu yaraan 5 cesho ka hor, khasnadda shirkadda ama tan Bangiga Dhexe ee Soomaaliyeed, intaan shirku bilaaban.»

L. 77

Guddoomiyaha Guddiga Maamulka

Xuseen Maxamuud Maxamed

SOMALI AIRLINES

AVVISO DI CONVOCAZIONE DE ASSEMBLEA ORDINARIA E STRAORDI

Gli Azionisti della Somali Airlines S.P.A. sono convocati in Assemblea Straordinaria e ordinaria in Mogadisico presso la sedo sociale per il giorno 12 Aprile 1980 alle ore 17:00 in prima convocazione e' occorrendo, in seconda convocazione il giorno 13.4.1980 alla stessa ora e nello stesso luogo per deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

Parte Straordinaria

1. Aumento del Capitale Sociale e deliberazione

Parte Ordinaria

1. Relazione del Consiglio di Amministrazione a Rapporto del collegio sindacale;

2. Presantazione del Bilancio e del conto profitti e perdite al 31.12.78 deliberasione relative;

3. Nuova nomina del Consiglio di Amministrazione e del collegio sindacale.

possono intervenire i Soci che risultino iscritti nel libro Soci ed abbiano effettuato il deposito delle azioni. per L'intervento in Assemblea le azioni potranno essere depositate almeno 5 giornipresso la cassa sociale o presso Banco Centrale di Mogadiscio.

L. 78

Il Presidente del Consiglio Ammiris trasione
Husein Mohamed Mahamud

SHIRKADDA «CONCERIA & CALZATURIFICO SOMALA

SALDHIGEEDU YAHAY XAMAR

Raasumaalkeeda Sh. So. 1.800.000

OGEYSIIS FADHI AAN CAADI AHEYN

Jaallayaasha saamileyya ah ee hirkadda «Cinceria & Calzaturificio Somala «ee saldhigeedu yahay, Xamar, waxaana la ogeysiinayaa in shir aan caadi aheyn lagu qaban doono saldhigga Shirkadda ee Xamar maalinta bisha Maarso tahay 20 saacadda, 17 fadhiga koowaad haddii fadhigaas suurogali waayo, waxaa la isku imaanayaa fadhiga labaad, Bisha Maarso tahay 22, isla saacaddaas iyo isla meesha ayada ah, si looga wada hadlo arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA DOODA

Talo ah in Raasumaalka Shirkadda oo ah 1.800.000 la gaarsiiyo Shs. 3.000.000 iyo wixii la xiriira gun gaaridda arrintaas.

Waxaa xaq u yeelan kara ka qeyb galka fadhiga, xubnaha ku qoran buugga shirkadda muddo shan beri ka hor, maalinta loo qabtay fadhiga, oo isla muddadaas gudaheeda ku soo dhigteen sahmiyadooda saldhigga shirkadda ama bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed ee Xamar.

MAAMULAHA IDMAN

L. 79

UJEEDDO: ISUYEERID FADHI AAN CAADI AHEYN EE

Shirkadda Beerta Murba Saldhigeedu yahay Afgooye.

Shirkadda Beerta Murba, waxey u yeereysaa dadka ku jira shirkadda oo ku saabsan fadhi aan caadi aheyn ee lagu qaban doono Xarunta Shirkadda oo ah Beerta dhexdeeda (Afgooye) maalinta bishu ay tahay 21 Febaraao 1980, saacadda 10ka subaxnimo

Muqdisho 17.2.1980

NOTAAYAHA

(Dr. Muumin Axmed Abuukar)

L. 80

SHIRKADDA BEER TACABKA LUUL S.P.A.

Saldhigeedu yahay Muqdisho Hahtideeduna tahay Sh. So. 1.100.000

OGEYSIIS ISUGU IMAATIN SHIR CAADI AH

Waxaa dhammaan saamileyda ka tirsan shirkadda Beer tacabka Luul S.P.A. la ogeysiinayaa in maalinta 28.6.1980, saacaddu marka ay tahay 10ka gelinka hore, xafiiska Notaayaha Dr. Muuse Xuseen Sadiiq, oo ku yaalla luuq Waddada Cabdulqaadir Sheekh Sakhaawaddiin, lagu qaban doono fadhiga shirka caadiga ah ee isla shirkaas kor ku magacaaban; haddii maalintaas ay suurtoobi weydo, in shirkaas loo fadhiisan doono maalinta 23.7.80, isla meeshaas iyo isla saacaddaas kor ku xusan.

Arrimaha shirkaas lagaga hadli doono waa kuwa soo socda:

1) Miisaaniyadda Sannadkii 1979;

2) Magacaabidda Maamulaha keli ah;

3) Magacaabidda Xubnaha Guddiga Baarista Xisaabaadka;

4) arrin kasta ee kale oo markaas fadhiga la keeno.

Shirkaas waxaa ka qeybgeli kara shirkadleyda kuwa muddo ugu yaraan shan maalmood ah ka hor maalinta fadhiga shirkaas loo cayinay, saamiyadooda soo dhigay Bankiga Ganagsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Saldhigga Dhxe ee Muqdisho.

Saamileyda waxaa laga codsanayaa in ay yimaadaadaan shirkaas; ayna dhowraan saacadaha fadhiga loo qabtay.

Maamulaha keli ah ee Shirkadda
(Picco Vittore)

L. 81

UJEDDO: SHIR CAADI DHAAF AH.

Saamileyda oo dhan iyo Baarayaasha Shirkadda la yiraahdo ORAI S.P.A. Saldhigeeduna yahay Marka, Maaliyadeeduna tahay, Sh.So. 1.200.000, waxaa laga codsanayaa in ay ka soo qeyb galaan shir lagu aban doono xafiiska IMPERESCO ee Muqdisho taariikhdu markay tahay 15ka Juunyo 1980, saacaddu markey tahay 19.00; waxaana looga wada hadli doonaa arrimaha hoos ku qoran:

1) Ku Darsanka shirkadda la yiraahdo CIFFE S.P.A. iyo Arrimaha kale ee dan u ah Shirkadda.

Haddii ay suura-gal noqon waayso shirkaas taariikhda aan kor ku soo sheegnay wuxuu shirku dhici doonaa maalinta xigta isla taariikhdii iyo isla meeshii.

O.R.A.I.S.P.A.
Kali Maamulaha

L. 82

UJEDDO: SHIR CAADI DHAAF AH.

Saamileyda oo dhan iyo Baarayaasha Shirkadda la yiraahdo CIEFFE S.P.A. Saldhigeeduna yahay SHALAMBOT «Marka» Maaliyadeeduna tahay Sh. So. 3.500.00, waxaa laga codsanayaa in ay ka soo qeyb galaan shirka lagu qaban doono xafiiska IMPERESCO ee Muqdisho taariikhdu markay tahay 15ka Juunyo 1980, Saacaddu markay tahay 19.00;

Waxaana looga wada hadli doonaa arrimaha hoos ku qoran:

1) Ku Darsanka shirkadda la yiraahdo ORAI S.P.A iyo arrimo kale ee dan u ah Shirkadda.

Haddii ay suura-gal noqon weyso shirkaas taariikhhda aan kor ku sheegnay wuxuu shirku dhici doonaa maalinta xigta isla taariikhdii iyo isla meeshii.

Kali Maamulaha

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU AKHRIYEY: dacwadda kor ku qoran;

HADDUU HUBSADAY: in Buug Keyd dhumay oo labmar-

kiisu ahaa 6635 lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe kuna qorneyd lacag dhan Sh.So. 15.530 uu iska lahaa Siraad Cismaan Kaahiye sida ku cad warqadda lam Taariikh oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Dhexe

HADDU ARKAY: qod. 69 sharciga lam, 2 ee 9.9.65

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortameno) Buug Keydka lam. 6635 oo ku qoran magaca Siraad Cismaan Kaahiye ayna ku jirto Sh.Sd. 15.530

WUXUU FASAXAY

In Bangiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta Dhexe u beddelo mudo aan ka yareyn 30 maalmood maalinta go'aankaa lagu una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegato Siraad Cismaan Kaahiye buugga Keydka ee kor ku tilmaaman daabaco Faafinta Ramiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho 17.2.80

Guddoomiyaha Maxkamadda G. Banaadir
W.S. Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax

L. 83

FAAFINTA RASMIGA AH EE LAMB. YAHAY 4 r 2 ee 28 Feb. 1980, Sharciga lamb. yahhay 6 12 Feb. 1980, Qod. 45aad waxaa laga tegay xarafka T. oo noqonaaya sida soo socota;

SAXID QALAD

Isla Faafinta kor xusan Xeerka lam. yahay 25 ee 7 Feb. 80 Xubinta 11aad, waa in loo akhrinaa sida soo socota;
,Jaalle Dr. Axmed Ashkir Bootaan Wasiirka Hidaha iyo Tas. Sare

t) Golaha Horumarinta ee Gobollada kale mid walba wuxuu ka koobmaa Xubnaha soo socda:

1) Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka Guddoomiye
2) Kaaliyaha 1aad ee Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka Xubin
3) Kaaliyaha 2aad ee Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka Xubin
4) Xoghayayaasha Guddiyada Xisbiga ee Degmooyinka Gobolka Xubin
5) Guddoomiyayaasha Golayaasha Shacbiga ee Degaannada Xubin
6) Guddoomiyayaash Ururada Bulshada ee Gobolka Xubin
7) Xoghayayaasha Dawladaha Hoose ee Degmooyinka Gobolka Xubin
8) Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed ee Gobolka Xubin
9) Taliyaha Qeybta Boliiska ee Gobolka Xubin
10) Taliyaha Ciidanka Nabadsugidda ee Gobolka Xubin
11) Taliyaha Ciidanka Asluubta ee Gobolka Xubin
12) Taliyaha Ciidanka Guulwadayaasha ee Gobolka Xubin
13) Isuduwaha Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta ee Gobolka Xubin
14) Isuduwaha Wasaaradda Caafimaadka ee Gobolka »»
15) Isuduwaha Wasaaradda Beeraha ee Gobolka Xubin
16) Isuduwaha Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa Xubin
17) Isuduwaha Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha ee Gobolka Xubin